# Bayaan kasoo baxay maamulka sare ee ururka UBAD
# 11-02-2025

**Ujeeddo: Warbixin guud oo ku saabsan ururka barbaarta aayaha dalka (UBAD)**

**Horudhac:**

Kooxdan dhalinyaro waxa markii ugu horreysey dhidibada loo taagey 31 janaayo 2024. Dhallinyaradan waxay bilowgii wakhti badan ku bixiyeen wacyigalinta dhinaca baraha bulshada, sidoo kale waxay sameeyeen kooxo wacyi gelin ka sameeya magaalooyin ka mid ah geyiga soomaaliyeed iyagoo xoogga saaraya isku keenidda dhalinyarada, aasaaska iyo sal u dhigidda urur dhalinyareed oo bulshada ka wacyi geliya qabiilaysiga.

Waxan nahay dhalinyaro u istaagey wadankoodo si ay uga baddbaadiyaan aafada qabiileysiga ee dhammaan bulshada soomaaliyeed saamaysey. Dhallinyarada ayaa ah tirada ugu badan ee bulshadeena, taasoo lama huraan ah inay buuxiyaan kaalintooda ku aaddan dib u dhiska dalka iyo wacyi gelinta bulshada, maadaama bulsho iyo dal kasta ku tiirsan yihiin dhallinyardooda.

Taariikhdu markay ku beegnayd 23.08.2024 waxa si rasmi ah loo daahfuray ururkan dhallinyaro oo la magac baxay URURKA BARBAARTA AAYAHA DALKA loona soo gaabiyey UBAD. Kadib ra'yi ururin lagu sameeyey dhallinyarada ku xidhan Qolkan waxay isku raaceen in ay samaystaan urur u shaqeeya dalkiisa hooyo iyagoo isla qaatay magacan quruxda badan ayna ka muuqato xanaaneenta dalka (UBAD).

***Ururka Barbaarta Aaayaha dalka oo loosoo gaabiyey UBAD.***

Ururka UBAD waxa u qorsheysan in uu dhallinyarada soomaaliyeed ka garab istaago hormarinta waxbarashada, wacyigelinta iyo baraarujinta bulshada, kor u qaadista xirfadaha iyo guud haan farsamooyinka kala duwan si loo helo dhallinyaro tayo leh.

## Wax qabadka iyo hiigsiga ururkan

Ururkan oo ay ku xidhan yihiin dhallinyaro gaadhaysa dhawr iyo toban kun wuxuu gundhig u yahay wacyigelinta bulshadeena iyadoo loo marayo baraha bulshada iyo weliba wacyi gelin si toosa looga fuliyo geyiga soomaaliyeed. Sidoo kale waxa ururkani u taagan yahay baraarujinta, isku keenidda, mideynta, isku xidhka dhallinyarada iyo guud ahaan ummadda soomaaliyeed. Ururkani wuxuu dardar geliyaa dib soo nooleynta jiritaanka iyo qiyamkii wadaniyadeed ee naga dhintay markii wadankeena burbur iyo dagaalo sokeeye aafeeyeen. Waxaa naga go'an taakuleynta iyo sare u qaadidda wacyiga ummadda soomaaliyeed kuwaasoo la daalaa dhacaya dhibaatooyinka ka dhashay colaadaha sokeeye ee qabiilaysigu saldhigga u yahay iyo shaqo la'aanta.

Ururka barbaarta aayaha dalka (UBAD) ayaa ku dhisnaan doona khidmadda joogtada ah taasoo ay bixiyaan dadka xubinta ka ah ururkan iyadoo lagu celinayo dadkeena iyo dalkeena. Kharashaadkaas waxa lagu fulinayaa qorshe hawleedyada ay samaynayaan waaxaha ururkani sida: Ololaha waxbarashada, ololaha ka wacyi gelinta qabiilaysiga, taakuleynta dadka qaba baahiyaha gaarka ah iyo shaqo abuur ku salaysan soo saaridda khayraadka dhulkeena.

**<u>Hawlaha socda:</u>**

1. Xulitaanka dadka aqoonta leh ee diyaarka u ah la shaqaynta Ururka UBAD.
2. Dhameystirka websideka,
3. Koontada Somalia
4. Furitaanka podcast/dood wadaag.
5. Wacyigalinta bulshada.
6. Illaalinta xogta Ururka.
7. Tirakoobida xubnaha Ururka.
8. Usameynta tababaro kor u qadaayo Xubnaha Ururka.
9. Balaarintaa Ururka.
10. Wadashaqeyta Ururada kale.

**<u>Ilaa iyo hadda Ururka waxa u qabsoomey:</u>**

1. Dajinta sharciyada iyo kala danbeynta qolkeena Telegaramka ee UBAD.
2. Sameyta qololka Faracyada iyo iskuduwayaashooda.
3. Garab istaaga bulshada soomaaliyeed ee tabaaleysan.
4. Wacyigalinta dhamaan shacabka soomaaliyeed gaar ahaan dhalinyarda.

5. Aqoon korodhsi ku salaysan sooyaalka geyiga somaaliyeed iyo afkeena soomaaliga.
6. Akhrinta iyo fahanka dastuurka jamhuuriyadda federalka soomaaliyeed.
7. Samaynta ciwaanada baraha bulshada iyo ka shaqaysiintoooda.
8. Ololo wacyigalin dhanka baraha bulshada.
9. Soo saarista dhallinyaro badan oo wacyigelin ka samaysa baraha bulshada iyo dhulkeena hooyo.
10. Diwaan galinta Ururka UBAD dalka iyo dibadiisa.
11. La kulanka culimada, dadka qoonta leh iyo siyaasiinta wadaniyadu ku jirto.
12. Sameynta jadwalka mawduucyada qolka Telegramka ee Ubad
13. Sameynta website-ka ururka UBAD.
14. Sameynta xeer hoosaadka ururka UBAD.
15. Dhisitaanka waaxaha Ururka.
16. Qorshe howleydka Waaxaha ururka oo lagu soo darey in ay mowduucyo ka soo jeediyaan qolka Telegramka ee Ururka.
17. Sameynta akonka yurub iyo paypal.
18. Ansaxinta qorshe howledka Ururka 2025.
19. Dajinta sharciyada xerarka doorashooyinkaa.
20. Dhisida gudiga doorashooyinka madaxa banan ee Ururka.
21. Doorashada Gudomiyaha URURKA iyo Agasimayaasha Waaxaha.
22. Dhisitaanka Profileka Ururka.

**Sharciyada iyo kala dambeynta kooxda Ururka Ubad.**

Dhamman bulshada ku xidhan kooxda dhalinyareed ee *Ubad* waa in ay raacaan sharciyada iyo kala dambeynta u dajisan kooxda. Fulintooda iyo ku dhaqankooda waxa ka masuula ah hogaamiyaasha Ururka Ubad Qofka jabiya sharciyadan hoos ku xusan waxa la xisaabtankiisa ka masuula ah waaxda ARRIMAHA GUDAHA IYO ISKU XIDHKA ururka
UBAD oo agaasimayo Muxudiin Jimcaale iyo waaxda GARSOORKA oo agaasimayo Rooble Cali.

1. **Sharciga dooda.**

Waa in uu jiraa qof mic/meyga hayo Admina ah laguna ixtiraamo.

Mawduuca/Topic-ga laga hadlayo lagama bixikaro.
Waaxa mamnuuc ah in qof la aflagaadeeyo lana abaaro qof gooni ah ama shaqsiyada qofka.
Qofna kama soo bixi karo muutka ilaayo qofka mic/meyga haayo aad ka heshid ogolaansho.

- **Xeerka ciqaabta: qabanaya qofka jabiya Sharciga dooda**

  a. Marka ugu horeyso waxaad leedahay dignin.
  b. Marka labaad waxa lagaa xirayaa micga mudo ku kooban 3 malin.
  c. Hadii aad qaladkaada ku sii socotid waxaa ka dhalan kara in qolka lagaa saaro

  Go´aankaasna waxaa garaayo agaasinka waaxda isku xirka iyo waaxda garsoorka UBAD.

**Fiiro gaar ah** qofka qaladka galay hadu yahay qof xubin ka ah ururka, agaasinka waaxda isku xirka ayaa lahadlaya Hadaan wax is fahan ah laga gaarin dacwadiisa waxa loo gudbinayaa waaxda garsoorka.

2. **Sharciga dadka cusub**

Qofka mic-ka/meyga haya ayaa ka masuul ka ah in uu ku soo dhaweeyo qofka cusub isaga oo u faafahinaya sharciga iyo kala dambeynta u yaala Qolka.

Qofka cusub waa in uu u hogaansamo xeerka iyo kala dambeynta u yaal qolka.

3. **Sharciga wax qabadka iyo horumarinta**

Dhamaan wax qabadka iyo hore u socadka waxa lagaga hadlayaa qolalka Faracyada
Wixii fikir ah waad la wadaagi kartaa qolka weyn, farrimaha muhiimka ahna fadlan kusoo dir Gmailka ururka: ururka.ubad@gmail.com

Qofkasta oo nagusoo biira waxaa ka codsanaynaa inuu masuuliyad iska saaro wax qabadka iyo horumarka dalkisa.

4. **Sharciga waxyaabaha mamnuuca ah**

A. Waxa ka mamnuuca qolka in lagu faafiyo ama lagaga hadlo waxyaabaha ka hor imanaaya diinteena islaamka iyo dhaqenkeena suuban.
B. Waxa ka mamnuuca kooxda in lagu faafiyo muuqaalada, qoraalada iyo linkiyada afkaarta xagjirnimsda, lama ogola taageeritaanka iyo amaanta ama ka hadalka ururada xagjiriinta.

**Xeerka ciqaabta qabanaya qofka jabiya qodobka 4 farqadda A iyo B.**

- Waxa isla markiiba lagaa saarayaa qolka ururka UBAD.

C. Waxa mamnnuuca in lagu xayeysiiyo qolka dhamman ganacsiyada.

D. Waxa mamnuuca ka been abuuritaanka, cayda iyo xadgubudka shakhsiyada dadka.
E. Waxa mamnuuca in linka ama qoraal aan quseen/khuseen qolka la soo dhiga. Waxa mamnuuca xaqiraada, liiditaank iyo yasida qof ama daad gaar ah.
F. Waxa mamnuuca in la sameeyo nin jecleysi, kooxeysi iyo kala qeybin bulsho.

**Xeerka ciqaabta: qabanaya qofka jabiya qodobka 4 farqada C ilaa f.**

- Marka ugu horeyso waxaad leedahay dignin.
- Marka labaad waxa lagaa xirayaa micga mudo ku kooban 1 malin.
- Hadii aad qaladkaada ku sii socotid waxaa ka dhalan kara in qolka lagaa saaro.

Go'aankaasna waxaa garaayo agaasinka waaxda Isku-xirka.

5. **Sharciga Sabuurada qolka Telegramka ee Ururka Ubad**

- Marka ay daruuri tahay qolka telegramka sabuurada waa la xidhayaa
- Marka ay Sabuurada xidhantantahay callka waxa lagu soo galayaa Mute
- Adminka ayaa ka masuula ah ka qaadista iyo saarida Mute-ka.

6. **Sharciga Meyga**

Qofka meyga haya waa in lagu ixtriraamo loona hogaansamo maamulkiisa.
Hadii aad rabtid in aad fikir ama wax su´aala ah ku darsaneysid mawduuca markaas socda ugu qor tirada 1 qofka meyga haya luuqiisa.

**Gabogabo:** Qolka *ururka Ubad* waxa uu furanyahay dhamaan bulshada soomaliyeed ee aamisan wada jirka, hormarinta iyo sare u qaadidda dadkooda iyo dalkooda.

**Fiiro gaar ah**: Qofka afkaar ku soo kordhinaya kooxdana ama su´aal kale u qaba maamulka kooxdani, si toos ah ugu qor warqad uguna dir emailka:

 Ururka.ubad@gmail.com

- Waxaad soo raacisaa magacaaga iyo wadanka aad ku nooshahay iyo telefoonkaaga.
- Waxa lagugu soo jawaabayaa muddo 72 saacadood gudahood.

**DHAMMAAD**

Maamulka ururka barbaarta aayaha dalka UBAD

URURKA BARBAARTA AAYAHA DALKA

UBAD